



# Somalia Non-State Actors (SONSA)

Off Afgoie road, Km Five, Hodan District Tel: +252612870023 info@ sonsaplatform.org www.sonsaplatform.org

## BAAQ

**Mogadishu 29 May, 2025:** Waxaa maanta shir isugu yimid Xubnaha Ururada Bulshada Rayidka oo ka kooban odoyaasha dhaqanka, culumo u diinka, dhalinyarada, haweenka, hay'adaha xuquuqda adaanaha u dooda, ururada saxaafada, bahda waxbarashada iyo ururada naafada waxaana shirka looga hadley xaalada dalka manta maraayo, khilaafyada siyaasadeed iyo gogosha u ku dhawaqaqey Madaxweynaha.

Shirka waxa laysku dhaafsadey aragtiyo ku aadan doorka ay bulshada rayidka ka qaadan karto sidii xal looga gaari lahaa khilaafka siyaasadeed ee ka dhashey kala aragi duwanaanshaha siyaasiyiinta ee la xiriira dib u eegista dastuurka, doorashooyinka iyo geedi socdka dowlad dhiska.

Shirka wuxuu kaloo diirada saarey saameynta khilaafyada siyaasadeed ku yeeshayn shacabka dhinacyada amniga, dhaqaalaha iyo midnimadooda. Sidaas darteed xubnaha shirka ka soo qayb galey waxey isla garteen in laga dhabeeyo hirgelinta gogosho sidii ay ku noqon laheyd mid xal siyaasadeed keento dalkana u horseeda deganaasho.

Bulshada Rayidka waxa ay ka digeysaa in la abuuro ficillo sababi kara rabshado iyo gacan ka hadal wax u dhimi karo dowladnimada, xasiloona iyo amniga dadka iyo dalkaba.

Bulshada Rayidka waxa ay welwel ka muujisey caqabadaha ka dhalan karo hadalada colaada dhalin karo oo ay siyaasiyiinta isku marsiinayaan saxaafada waxeyna soo jeedinayaan in la joojiyo hadalada ka soo baxaayo mas'uuliyiinta qaarkood oo caqabad ku noqon karo geedi socodka nabada.

Bulshada Rayidka waxa ay aaminsan tahay in wada hadal looga bixi karo khilaafka siyaasadeed sidaas awgeed si gogosho miro dhal u noqoto waxey go'aansadeen in ay door fududeyn iyo dhexdhetaadin ka qaatan si looga gudbo caqabadaha dalka ka jira.

Ugu danbeyntii bulshada rayidka waxa ay ku baaqeysa arimahan hoos ku qoran:

1. In gogosho wax sharuud ah lagu xirin isla markaasna cid kasta oo wax ku biirin karta laga tixgeliyo.
2. In laga fogaado wax kasto oo suurtogal ka dhigi karo in xalka laga raadiyo dibadda laguna kalsoonaado dadaalada bulshada rayidka.
3. In dhamaan waxgaradka iyo hogaamiyaasha bulshada ay si wadajir ah uga shaqeeyan amniga iyo nabada dalka.
4. In saaxafada dalka qayb ka noqdaan xalka iyagoo ka fogaanayo baafinta wararka colaada ka dhalan karaan ama marin habaabin ku sameenayo bulshada.
5. In si wadajir ah looga shaqeeyo sidii looga hortegi lahaa faragelinta shisheeyey oo wax u dhimi karo dowladnimada.

DHAMAAD